

Xeerar iyo talooyin cusub oo khuseeya waddanka oo dhan laga bilaabo 20. janaayo 2021

Booqashooyinka guryaha

- Waxa wacan in dadkoo dhan yareeyaan la jooga dadka kale.
- Waxa wacan in dibedda lagu kulmo.
- Waxa wacan in aan martidaadu ka badan 5 qof, oo la joogi kara dadka guriga degan.
- Si kastaba waa in aan marnaba laga badan tiro keenaysa in la kala fogaan kari waayo.
- Carruurta xannaanooyinka iyo dugsiyada carruurta waxa soo booqan kara carruur ka tirsan kooxdooda joogtada ah.

Isu-imaanshooyinka gaar ah iyo qabanqaabooyinka

- Waxa wacan in dib loo dhigo ama la baajiyo qabanqaabooyinka.
- Waa **sharci-darro** in dad ka badan 10 qof isugu yimaadaan qabanqaabooyin gaar ah oo ka dhacaya meel ka baxsan guriga. Haddii ay guriga deganyihiin in ka badan 10 qof, waa la ogolyahay in dadkaas wada nool meel ku wada kulmaan
- Waa **sharci-darro** in wax ka badan 10 qof lagu joogo qabanqaabo lagu qabanayo gudaha oo ku saabsan dhaqan, seminaaro, diin, xaflad, ciyaaro iwm.
- Waxa hal qabanqaabo waxa wada joogi kara 200 qof haddii qof kastaa ku fadhiyo kursi aan la durkin karin oo meel ku dhegan. Aasaska dadka dhintay waxa joogi kara ugu badnaan 50 qof, inkastoo kuraasku meel ku dhegnayn.

- Qabanqaabo dibedda ah waxa wada joogi kara ugu badnaan 200 qof. Laakiin waxa wada joogi kara 600 qof haddii qof kasta u fadhiyo kursi meel ku dhegan.

Dib u dhig hawlaha/qabanqaabooyinka ka dhacaya gudaha

- Carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sanno jir waxay sidii caadiga ahayd ayey u samayn karaan tabobarada iyo hawlaha wakhtiga firaaqada, gudaha iyo dibeddaba. Carruurta iyo dhallinyarada waxa laga dhaafay kala fogaanshaha halka mitir ah marka marka ay suurtagal ahayn.
- Ciyaaraha kooxo isla ciyaarayaan, koobabka iyo tartannada iyo wixii la mid ah waa in dib loo dhigo.
- Dadka waaweyn waxannu weli kula talinaynaa in aanay ka qaybgelin qabanqaabooyin ka dhacaya gudaha. Dadka waaweyn waxay jimicsi ama tabobar ku samayn karaan dibedda haddii ay kala fogaan karaan.

Safarrada

- Iska dhaaf safarada laga maarmi karo ee ah waddanka gudihiisa ama dibadiisa.
- Safarka ku laabashada goobta waxbarashada waxa loo arkaa lagama maarmaan.

Iskuullada iyo waxbarashada

- Dugsiyada dhexe iyo dugsiyada sare waxa laga dhigayaa heerka huruuda.
- Degmooyinka faafitaanku ku badanyahay waxay iskuullada iyo xannaanooyinka u deyn karaan heerka cas.

Goobaha shaqada

- Qof kasta oo fursad haysta waxa lagula talinayaa inuu shaqada ku qabsado xafiis-guriyeed.

Dukaannada

- Dhammaan suuq-weynayaasha (moolalka) iyo dukaannada waxa ku haboon inay xad u sameeyaan tirada dadka si kala fogaansho loo samayn karo, isla markaana ay hubiyaan dadka soo galaya

Ciyaaraha

- Carruurta iyo dhallinyaradu way ka qaybgeli karaan tabobarrada iyo hawlaha wakhtiga firaaqo ee ka dhacaya gudaha iyo dibedda. Ciyaaraha dhexmaraya kooxo, koobabka iyo tartannada waa in dib loo dhigo.